



Bandhiga iyo Baafinta Mashruuca Isku-xirka kaabayaasha Dhaqaalaha ee Geeska Afrika ee Soomaaliya

Bangiga Adduunku wuxuu Dawladda Federaalka ee Soomaaliya ku taageerayaa sidii loo xoojin lahaa awooddeeda dhaqaale iyo dekedaha marinnada horumarka dhaqaalaha ee Soomaaliya. Waxaana loo marayaa hirgelinta howlaha hoos imanaya Mashruuca isku-xirka Kaabayaasha Dhaqaalaha ee Geeska Afrika loona soo gaabiyo 'SHIIP' oo ay Soomaaliya kamid tahay wamada kaa faaideesanaayo mashruucaan.

Mashruuca SHIIP waxay ujeedadiisu tahay inuu diyaariyo aasaaska isdhexgalka dhaqaale ee Soomaaliya iyo Geeska Afrika inteeda badan ("Horn of Africa"). Mashruucaan ujeedada looga golleeyahay ayaa ah in lagu taageero kobcinta awoodda dhaqaale ee Geeska Africa iyadoo la sameynayo daraasado iyo sameynta daraasado kala duwan oo falanqeyn iyo farsamo ah oo loogu talagalay howlaha gaarka ah ee gobolka ee lagu qeexay Hindisaha Kobcinta dhaqaalaha geeska Afrika, ee la xiriira marinada dhaqaalaha (wadooyinka iyo baayac-mushtarka, iyo kaabayaasha/marinada tiknoolijiyada iyo isku xirnaanta marinda tamarta ee laga yaabo inay khuseyso), iyo waxqabadyada si gaar ah laxiriira isku xirnaanshaha maxalliga ah ee marinnada dhaqaalaha iyo isku xirnaanta ka dhexeysa dowlad-goboleeyada xubnaha ka ah.

Mashruucu wuxuu dejin doonaa habraaca fulinta mashruucyo u diyaarsan dhuumaha maalgashiga ee kaabayaasha aasaasiga ah ee marinnada gobollada (*regional corridors*), aasaaskana u dhigaya hey'ado ku wanaagsan maareynta, iyadoo la qaadanayo tallaabooyin tayada hay'adaha lagu adkeynayo.

Tallaabooyinkaas oo ah kuwo baaris iyo qiimeyn cilmiyeysan ku yimid. Gaar ahaan, mashruucu wuxuu wax ka qabanayaa dulduleelada kusoo baxa dhirin-dhirinta hey'adaha, wuxuuna diyaarin doonaa daraasadaha suurtagalnimada mashruuca ah ee loo baahan yahay iyo naqshadaha lagama maarmaanka u ah maal-gashiga mashruucyada ee mustaqbalka. Iyadoo dhidibada loo aasayo tayeynta watiga dhow iyo ka fog ee tayeynta hey'adaha. In kasta oo mashruucani uusan shaqooyin dhismo ah hergelin doonin, haddana daraasadaha kala duwan iyo waxqabadyada Tayo-dhiska ah ayaa loogu talagalay in lagu dhigo aasaaska shaqada mustaqbalka iyo maareynta mustaqbalka ee mashaariicda.

Mashruucan waxaa fulin doonta Wasaaradda Howlaha Guud, Dib u Dhiska iyo Guriyeynta ("MPWRH") ujeedkuna waa dhisidda kaabayaal qaran oo ammaan ah, dhaqaalaha kordhiya, hufan oo cimriya/waara. Si wasaaradda loogu caawiyo gaaridda ujeedooyinka mashruuca, waxaan la oghiisanayaa dhamaan daneeyayaasha hay'adaha qaranka, kuwa gaarka loo leeyahay iyo dhinacyada kale ee mashruucu ku lug yeelan karo. Ujeedada daneeyayaasha mashruuca loola socodsiinaayo ayaa ah in la helo talo iyo jawaab celin ka timaada daneeyayaasha dalka, kuna saabsan qaabeynta mashruuca. Sidoo kale waxaa la rabaa iney ka jawaab celiyaan qaabka Bey'ada iyo Bulshada looga taxadaray ay tahay mid haboon dalka Soomaaliya.

Mashruucaan waxaa uu xoojin doonaa hayadaha dawlada ee ka shaqeeya Kaabayaasha, ganacsiga iyo koboco dhaqaalaha, isla markaana, mashruucan waxa uu daraasad iyo qiimayn ku samayndoona wadooyinka gaaraya dhirikooda 550km dalka oo dhan ah.

Sidoo kale mashruucan waxa uu samayn doonaa shaqo abuur iyo xoojinta sugnaanta kaydka cuntada, si uu dalka u gaaro isku filnaansho dhaqaale iyo barwaaqo.

Ujeedaka ugu way ee mashruucaan loo fulinaayo ayaa ah in la isku xiro wadooyinka, Ganacsiga iyo is dhexgalka bulshada dalalka geeska Africa sida Somalia, Kenya, Ethiopia iyo Djibouti, iyadoo la hormarinaayo wadooyinka si loo xoojiyo nabad galyada iyo yaraynta kharashaad ku baxa isticmaalka wadooyinka.

Qaybaha Mashruuca SHIIP uu ka kooban yahay waxa uu xooga saari doonaa horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha ee ay ku jiraan siyaasada gaadiidka, ganacsiga, iyo dhiirogalinta ka hortaga xadgudubka jinsiga ee lagula kaco dumarka.